

Ururada iyo aktiifiteetyada wakhtiga firaaqada!



Waa hage ama tilmaame loogu talagalay
adiga oo ah qof ku cusub wadanka
Iswiidhan sida aad adiga iyo reerkaaguba u
helilahaydeen aktiifiteetyo.



Bilowga hore

Adigoo ah qofkii cusbaa waxaa laga yaabaa inaad ka fikirto inay jidadka iyo suuqyada magaalada aad deggen tahay ay faaruq yihiin fiidkii. Gaar ahaa xilliga jiilaalka/qabowga iyo marka dukaamada la xiro kadib. Way adag tahay in la ogaado meesha ay dadku ku caweeyaan ama isu raacaan iyo sida dadka cusub loo barto.

Waxaad jeelaan lahayd inaad la kulanto saaxiibo oo aad luqadda iswiidhishka ku barato, laakiin sidee?

Arbixintani waxay adigu kugu hagysaa macluu-maadyo kala duwan oo ku saabsan sida aad adiga ama qoyskaagu ku helikartaan aktiifiteetyo aad samaysaan wakhtigiyada aad firaaqada tiihin.

Wadamo badan nolosha arrimaha bulshadu si lama filaan ah ayey u dhacdaa. Wadanka Iswiidhan waa wax si nidaamsan loo abaabulo. Waxaa la kulmaa wakhti khaas ah oo goob cayiman lagu kulmo. Dad badan ayaa taga ururada, naadiyada, goobaha waxbarashada iyo koorsooyin waqtigooda firaaqada ah, si ay ula kulmaan dadka oo day u soo baashaalaan.

Waa la hubaa inaad adigu helikarto wax ku xiiso geliya, kuwaas oo aad u arkidoonto inay yihiin madadaalo iyo muhiimba, hanoqoto shimbiraha, kubbada kolayga ama siyaasad. Sidoo kale waxay degmada qudheedu haysaa aktiifiteetyo ay ka qayb qaadankaraan dadka waaweyn iyo caruurtuba. Wax si wadajir ah loo xiisaynayo ayaa noqonkarta wax fiican inay dadku is bartaan, luqadda iswiidhishka lagu barto saaxiibana la samaysto.



Waa max-ay waxaad adigu xii-saynay-saa?



Liisto erayo ah

Iswiid-hishka	Soomaaliga	liraaniga	Carabiga	Ingiriiska	Ereterida
Förening	Xarunta	انجمن	جمعية	Non-profit Association	ማክበር
Intresse/ Hobby	Xiisaha/ hiwaarad	علاقه/ سرگرمی	اهتمام/ هواية	Interest/ hobby	አንስኬድ ተገኝነት
Ideell	Doon ahayn	غير انتفاعي	غير ربحي	Non-profit	ማክሰብ ዘመንለ
Frivilligt	Iskaa wax u qabso	داوطلبانه	طوعي	Volunta-rily	ወላጊዊ , በደረሰ
Fritid	Firaaqada ah	وقت الفراغ	وقت آزاد	Free time/ Spare time	ፍትህ ዓመታዊ
Medlem	Xubin	عضو	عضو	Member	እባክ , ማክበርታች
Avgift/ kostnad	kharajka	هزينه/خرج	رسوم/ تكاليف	Fee	አፍላት / ወጪ
Ledare/ träner	tababare	قائد/ مدرب	رهبر/مربي	Instructor/ Coach	ወራሱ / አሳምና
Demokrati	dimqraadiyad	ديموكراسي	ديمقراطية	Democracy	ዶሞክሪሲ

Ka kooban

1. Urarada Iswiidhan

- Shan wax oo aad u baahan tahay in aad ogaato
- Haddii aad doonayso in aad tijaabiso aktiifiteet
- Liiska hubinta – su'aalo wanaagsan oo lays waydiinkaro

2. Baro adigu wax cusub!

Oo ku saabsan waxbarashada dadweynaha

3. Sidee ayaan anigu warbixin ku helikaraa?

4. Hawlaha ay degmadu wado

5. Hadaanad awoodin (dhaqaale u hayn)

Nolosha ururadu waxay leedahay taariikh dheer, aad bayna u soo jirtay aadna waxay muhiim ugu tahay dimuqraadiyadda Iswiidhan. Bilowgii qarnigii 20aad, waxaa soo ifbachay dhaqdhaqaqyo caan ah oo muhiim ah. Dadku waxay isugu yimaadeen ururo si ay bulshada wax uga beddelaan. Waxa tusaale ahaan loo mahadinaya sida dhaqdhaqaqa shaqaalaha iyo dhaqdhaqaqa haweenka dhamaan muwaadiniinta Iswidhan waxay xaq u leeyihiin inay wax doortaan maanta. Inay dadku xor ka yihiin dhaqdhaqaqa kiniisadaha waxay keenaysaa inaynu diinta aynu doono aaminsanaan karo.



Ururada Iswiidhan



Associations are important in Sweden. There are more than 200,000 associations with more than 31 million members in Sweden. This means that on average every Swede is a member of three associations.



Shan wax oo aad u baahan tahay in aad adigu ogaaato:

1. XIISE WADAJIR AH

Urur waa koox dad ah oo leh xiise isku mid ah. Xiisaha isku mid ahi wuxuu noqonkaraa beerista, qoob ka ciyaarka, sawir qaadista, kubbada cagta, karate ... iyo wixii uu doono! Ururku wuxuu carruurta ama dadka waawynba ama laba-doodab u hayaa aktiifiteetyo.





**Ururku
waa meel
lagu
kulmo oo
fursadna
laga helo!**

2. URURADU WAA KUWO KHEYRI AH

Ururada badankoodu waa kuwo khayri ah. Taasi waxay ka dhigan tahay inaysan iyagu macaash doon ahayn, dadka ururka hoggaamiye ama tababarayaasha, waa dad tabaruc ahaan wax ku qabanaya, waqtiga ay firaaqada yihiina wakhtigooda gelinaya. Ururku dhammaan dadka ayuu ka dhexeyya, ma aha sida ay shirkadu u shaqayso inay dad yari keligood leeyihii oo keliya. Shaqo uma aha mana helaan wax mushahaaro ah ee waxay sidaa u samaynayaan oo u arkaan inay mihiim tahay xiisana leedahay.



3. XUBINNIMADA IYO DIMOQARAADIYADA

Jaaliyaduhu waa kuwa dimuqraadi ah, qof walba oo Xubin ahi wuxuu leeyahay hal cod. Ururadu dhammaantood waxay leedahay kulan sanadle ah. Halkaas ayaa si wadajir ah go'aan looga gaaraa su'aalo kala duwan. Wuxuu qaybgal shirka sanadla ah. Hadaad xubin ka tahay fikradahaaga iyo talooyinkaagaba waa la soo dhowaynaya!

4. KHARASHKA

Waxaad xubin uga noqon kartaa urur adigoo iska diiwaangelinaya oo bixinaya khidmadda xubinnimada. Xubnaha dhammaantood way bixiyaan. Maadaama uu uruku yahay mid khayri ah lacagta waxa lagu bixiyaa kharashyada ururka, qof iyo shirkad toona lama siiyo. Kharashka waxa lagu bixinkaraa kirada, dharka lagu tababarto, kafee ama shah iyo dalxiis xubnaha ururka loo kaxeyyo. Aktiifiteetyada la samaynayaan kharashkoodu wuu kala duwanaankaraa. Mararka qaarkod waa qaali marna way jaban tahay. Mararka qaarkoodna waa lacag la'aan.





5. WAA LAYSWADA CAAWINAYAA

Maadaama uu ururku yahay mid khayri ah xubnaha dhammaantood waa muhiim waxaanay iska caawiyaan waxyaabo kala duwan. Looma baahna wax lacag ah ama aqoon gaar ah ee inta badan waqtigaaga ayaa kugu filan.

Haddii ay tahay waxqabadka carruurta, markaa waalidku aad ayey muhiim u yihiin! Ururku ma aha sida dugsiga xannaanada carruurta oo aad uga tagi karto ilmahaaga shaqaalaha. Adiga aabbaha ama hooyada ayaa ka mas'uul ah carruurta in aad u raacdoo ururka, marmarka qaarko-dna waad la joogysaa.

Tusaale ahaan waxyaabaha waalidku ku caawinkaro waa:

- Ka caawinta aktiifiteetka la qabanayo, tusaale iibinta biibitada (kiosken) iyo kafeeyga
- Dharka ay kooxdu aktiifiteetka ku soo samaysay oo loo dhaqo
- Haddii aad baabuur leedahay, waxaad ka caawin kartaa kaxaynta kooxda tartamaysa ama marka ay meelaha kale ku soo ciyaarayaan



Haddii aad doonayso in aad tijaabiso aktiifiteet

- Ururada inta badan booqasho ayaa loogu tegikaraa oo dhowr goorayaad lacag la'aan tijaabo ahaan la samaynkartaa. Wixii intaa ka dambeeya haddii aad adiga ama tusaale ahaan ilmahaagu rabtaan xubinayaad ka noqonaysaan.
- Haddii aad rabto inaad tijaabiso, la xiriir ururka marka hore oo weydiigoorta aad u tegikartid. Waxa kale oo iyaduna fican in aad weydiiso magaca iyo lambarka taleefanka ee hogaa miyaha kooxda ama ururka. Mararka qaarkood way adag tahay in la helo meesha uu ku yaalo, haddii aanu ururku lahayn tabeeli magacoodu ku yaalo ama uu xiran yahay. Waxa kale oo aad weydiin kartaa inuu qof ururka ka socdaakugula kulmo goobta.
- Haddii aad adigu rabto in aad tijaabiso ama aad rabto in aad markiiumugu horaysay aado aktiifiteed, adiga naftaadu ama uu ilmo kula socdo, sii ogow kabaha ama dharka loo baahan yahay. Haddii uu yahay isboori waxa badanaa fican in aad qaadato dhar dabcasan oo wangaasan iyo dhalada biyaha lagu cabo

**Ururadu inta
badan way daaf
furan yihiin
waanay jecel
yihiin xubnaha
cusub! Ku
dhiiro in aad
wax weydiiso!**



- Haka cabsanin adigu in aad wax waydiiso!
- Aktiifiteetyada iyo ururada qaarkood waxay noqon karaan kuwo la jecel yahay oo safka loo galo. Waxay tusaale ahaan noqon kartaa dabaasha ama jimicsiga. Markaa adiga ama ilmahaagu toos uma bilaabaysaan, ee waa in aad saf gashaan. Badanaa waxa lagula soo xiriiraya marka uu boos bannaanaado ama koorso cusub la bilaabay. Wuxuu taas caan ku ah iskuulka Muusiga iyo kan Dhaqanka.
- Ka fikir ururada iyo aktiifiteetyada kala duwani way kala kharash duwan yihiin. Haddii aktiifiteet gaar ah ay lacagiis u badan tahay, waxa dhicikarta inay jiraan ururo kale oo iyaguna xiise yeelankaraan? Gadaal ayey ka imanayaan tallooyin ku saabsan haddii aanad adigu lacag u hayn.
- Haddii adiga ama ilmahaagu aadan haysan qalabka loo baahan yahay (tusaale dhar gaar ah ama kabo) waxaad weydiin kartaa haddii qof ka tirsan ururku inuu hayo waxyaabo dheeri ah oo aan hadda la isticmaalin. Hogaamiyaha kooxda ayaa kaa caawinaya.

Liiska hubinta

Waa kuwan qaar ka mid ah su'aalaha ay fiican tahay in aad weydiiso mar-ka aad booqato ama aad xubin ka noqoto urur:

- Sidee ayaan ku bixinkaraa lacagta xubinnimada iyo/ama kharashka tababarka?
- Sideen ku helikaraa macluumaadka iyo warbixinada aktiifiteetyada? Ma jirtaa liisto uu iimayl ku qoran yahay ama koox Facebook guruuba ah? Ururada gaarkood wixii macluumaad ah waxay geliyaan boggooda internetka. Weydii hogamiya ururka sida ay sameeyaan.
- Waxyabaha ay xubnaha ururku ama waalidiintu ka caawiso ururka? Waa maxay waxa aniga xubin ahaan layga filayaan?
- Haddii ay luqadu kugu adag tahay, waxa dhicikarta in aad haysato saaxiib ama qof faamliga ka mid ah oo hogamiyaha ururka telefoon ku waca? Si aanu kuu dhaafin macluumaad muhiim ahi. Haddii kale weydii ilaa aad ka fahmayso!



Baro wax cusub!

oo ku saabsan waxbarashada dadweynaha

Miyaad adigu rabtaa in aad barato wax cusub? Mise waxa jira wax aad ku fiican tahay oo aad dadka kale barikarto? Luqad in aad dhigato? Cunto Karin? Harqaan ama dharka gacanta lagu tolo? Qalabka muusiga in aad tunto? In aad su'aal muhiim ah ka doodo?

Markaa waxaad ku biiri kartaa goob waxbarasho. Koorsooyin waxbarasho oo aad samaynayso waqtiga aad firaaqada tahay, halkaa soo aad wax kula baraneyso dadka kale.

Iswiidhan waxaa ka jira 11 ururo waxbarasho (hoos fiiri). Ururada waxbarashada bixiya waxa jira noocyoo waxbarasho oo gaar ah oo loogu talagalay dadka waaweyn. Waa lacag la'aan waana ikhtiyaari. Waxay ku saabsan tahay inuu qof kastaba uu xaq u leeyahay inuu waxbarto oo horumar sameeyo. Waxay noqon kartaa goob waxbarasho (studiecirkel) ama koorso. Mararka qaarkood waa lacag, marmarna waa bilaash

Haddii aad rabto inaad adigu bilowdo in aad dadka waxbarto waxaad la xiriiraysaa mid ka mid ah ururada waxbarashada bixiya (studieförbund) oo ku yaal meesha aad deggen tahay. Badanaa waxay kaa caawin karaan tusaale ahaan qolka aad wax ku barayso ama qalabka aad u baahan tahay.

Waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan ururada waxbarashada (studieförbund) bogga www.studieforbunden.se.



Aktiifiteetyada degmada

Hadda waxaad heshay macluumaad ku saabsan ururada iyo ururada waxbarashada (studieförbundet) iyo sida aad u heli karto aktiifiteetyada adiga iyo qoyskaaguba aad samayn kartaan wakhtiga aad firaaqada tiiin.

Degmadu waxay sidoo kale leedahay aktiifiteetyo kala duwan oo loogu tala galay caruurta iyo dadka waaweyn. Halkan waxaa ku yaal tallooyin:

Rugta buuggaata/maktabada

Rugta buuggaagta waxaad ka amaahankartaa buuggaag, laakiin waxa inta badan ka jira aktiifiteetyo kala duwan. Tusaale ahaan kuwa caadiga ah waa:

- Kooxo carruur iyo dadwaaweyn isugu jira. Sawir, jinjiyeyn, farshaxan
- Wakhti sheeko oo carruurta loogu talagalay
- Shaah iyo sheeko
- Buug si joogto ah loo akhriyo oo laga doodayo waxa ku qoran (bokcirkel)
- Badhigyo tusaale tiyaatar
- Talo bixino



Aad rugta buuggaagta/maktabada oo waydii barnaamijka siduu yahay!



Iskuulka muusiga- yo dhaqanka

Haddii aad leedahay ilmo rabo inuu barto sida muusiga loo garaaco inta badan lagama sameeyo ururada ee iskuul ayaa loo galaa. Waxaa badanaa loo yaqaan Iskuulka Muusikada ama (Kulturskolan). Waxaa sidoo kale jiri kara koorsooyinka qoob ka ciyaarka ama tiyaatarka. Badanaa foom ayaa la buuxiyaa ama internetka ayaa laga codsadaa. Qaar ka mid ah qalabka ama koorsooyinka la jecel yahay ayaa laga yaabaa in saf loo galo, ka dibna uu ilmuhi sugo muddo hal ama laba termiin. Macluumaad arrintaa ku saabsan waxaad ka helikartaa bogga internetka ee degmada, ama waxaad weydiinkartaa iskuulka. Dhammaan carruurta dhigata iskuulka way iska diiwaangelin karaan.



Wax kale



Dabcan waxa jira waxyaabo badan oo kale! Degmooyinku way kala duwanaankaraan. Tusaale ahaan qaarkood waa xarumaha wakhtiga firaaqada ee carruurta iyo dhal-linyarada, guryaha dhaqanka ee loogu talagalay muusikada iyo tiyaatarka, meelaha lagu kulmo iyo aagagga dabiiciga. Degmooyin badan ayaa leh meelo lagu dabaasho. Hal-kan waxa laga heli karaa dugsiga dabaasha ee carruurta, iyo mararka qaarkood sidoo kale dadka waaweyn. Mararka qaarkood ururka ayaa iska leh iskuul dabbaasha lagu barto. Shaqaalahaa dabaasha ayaa waxbixin dheeraad ah kaa siinkara . Qaybta xigta, waxaad ku baran doontaa wax badan oo ku saabsan sida loo helo macluumaadka!

Sida loo helo urur

Hadda wax yar ayaad ka taqaanaa sida ururku u shaqeeyo. Laakiin sida loo helaa macluumaadka? Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad ogaato: Waa maxay ururada ka jira magaaladayda? Goorma iyo halkee ayey ku kulmaan? Waa imisa qiimahoodu? Ma u tegikaraa oo ma soo tijaabinkaraa?



Waxaa jira siyaabo kala duwan oo loo helo macluumaadka. Badanaa waxaa laga helaa internetka, laakiin way yara adkaan kartaa in la helo.

Halkan waxaa ku yaala dhowr warbixinood:

Diiwaanka ururka

Degmooyinka badankoodu waxay leeyihiiin diiwaan ama liisto ku taala bogga websaydhadooda halkaöa waxaa badankooda ku yaala liisto ay ku qoran yihiin ururadu. Halkaas waxaad ka raadin kartaa waxyaabo kala duwan qaybaha iyo aktiifiteetyada, iyo in aad ka hesho macluumaad cida aad la xiriirayso.

Si aad u hesho diiwaanka, ka raadi Google:

"Diiwaanka ururada + magaca degmadaada" (tusaale "diiwaanka ururada ee Kristianstad"). Waxay u ekaan kartaa sidan:

Guji leenka si aad u gasho diiwaanka jaaliyada

föreningsregister Kristianstad

Ungefär 7 300 resultat (0,43 sekunder)

www.kristianstad.se › foreningar-foreningsliv › Föreningar, föreningsliv - Kristianstads kommun

Föreningsregister. Du hittar alla föreningar i vårt föreningsregister. Föreningsregistret hittar du under E-tjänster. Om du som förening behöver uppdatera dina ...

www.kristianstad.se › forening › Föreningar - Fri Föreningsregister - Kristianstads kommun

bidrag. Tjänsten är inte tillgänglig för tillfället. Har du några frågor eller synpunkter på vårt föreningsregister, kontakta medborgarcenter på telefon 044-13 50 ...

www.kristianstad.se › lattlast › fritid › foreningar › Lattlast: Föreningar - Kristianstads kommun

Guji leenka si aad u hesho diiwaanka jaaliyadaha. Halkaas ayaa laga heli karaa waxaad arkaysaa ururada kala duwan ee jira, oo waxaad ka heli kartaa websaydhka iyo meelaha lagala xiriirayo. Sidan ayey kuula ekaan karaan:

Föreningslista

För mer information, klicka på föreningsnamnet

Visa resultat på utskriftsvänlig sida

Africanska Uppdoms Förening J	Kristianstad Start/lett Cheer	Grekiska Föreningen	Equeria Ricknun
Skåne	Kristianstad Taekwondo IF	Irländska centrum för kultur och social	Evangelisk Lutherska Föreningen
Kulturfritid	Kristianstad Thaiboxing	Kinesiska barn & kultur förening	Förbundet Åhusleden FES
NIMT Konstantinverkni i Kristianstad	Kickboxningsklubb	Kurdiska Kulturföreringen	Sv. Cyklars Unga Lindebor/Ägocut
Biständsförening	Kristianstads Atletikklubb	Mansdelska föreningen	Sv. Cyklars Arbatsförening
Diskoriforum	Kristianstads Boxningsklubb	Palestinska Föreningen	Ähus Frälskyrkoförsamling
Lions Club i Kristianstad	Kristianstads Bandyfotbollklubb	Sansen	Östermalmskyrkans Barn & Ungdom
Hädsta Barriär Kristianstads	Kristiansstad Cykelföring	Serbiska Föreningen	
Lokalförbund	Kristianstads Damfotbollsföring	Ståndes Horn af Afrika Förening	
Råddna Barrarnas Lokalförening i Ähus	Kristianstads Fysiklubb	Somaliiska Fritids- och	
Osterlättens Röda Kors	Kristianstads Folkvaretut	Kulturgruppen	
Fritidsrådsförening	Kristianstads Fotbollsallians	Sudaniska Föreningen	
Kristianstads Fritidsrådsforum	Kristianstads Fotbollsförening	Svensk Litauiska lokalföreningen	
Handikappförening	Kristianstads Golklubb i Ähus	Svensk	
Ateljéförening i Kristianstad	Kristianstads Ishockeyklubb	Kristianstads Judoklubb	
Attention Norrström Skåne	Kristianstads Judoklubb	Sjörörelsens Engagemangs Förening	
Bowlingklubben Skål	Kristianstads Konståckslubb	Kristian	
DHF Kristianstads Avd.	Kristianstads Karateklubb	Syraka Al-Rodwan i Kristianstad	
Dövors Förening / Knöt med omväld	Kristianstads Kyrolykubb	Vår Palestinska Hemförening	
Etegealitengnominen Norna Skåne	Kristianstads Modellflygklubb	Kulturförening	
FUB Kristianstad	Kristianstads Motorcyklist	Assurans Vänner	
Föreningen Furuboda	Kristianstads Pensionär	Asokron	
Handicapidrottsföreningen Klimen	Bowlingklubb	Arkeologus Gamlemedeltidsgr	
Hjärt och Lungsjukas Förening	Kristianstads Pilotklubb		

Guji hal urur si aad u hesho meesha aad kala xiriirayso ama bogga websaydkooda

Google iyo Facebook

Waxaad sidoo kale si toos ah uga raadin kartaa aktiifiteetyada aad rabto inaad hesho. Isku day adigu Google iyo Facebook. Waxaad ka raadin kartaa tusaale ahaan. "Schack Hässleholm" ama "dabaasha Osby" Marka, aktiifiteetka aad rabto inaad hesho oo lagu daray magaalada aad deggen tahay.

Jaaliyado badan ayaa leh bog Facebook ah oo ay ku qoraan macluumaadka iyo sawiro. Waxaad halkaa mararka qaarkood ugu qori kartaa fariin, tusaale ahaan. inaad rabto inaad timaado oo aad tijaabiso.

Weydii qof!

Ma taqaanaa qof magaalada muddo dheer deggenaa? Qof aad isla shaqaysaan ama macalin, qof aad deristihii? Waxa laga yaabaa in aad aado meel sheeko iyo shaah loogu talagalay? Weydii qof halkaa jooga!

Ma dhigataa koorso loogu talagalay ha-nuuninta bulshada? Weydii macalinkaaga halkaa jooga qofkaas ayaa kaa caawinaya.

Haddii ay khusayso ilmahaaga, waxaad u sheegi kartaa macallin ama la taliyaha arrimaha bulshada (kurator) inaad rabto inaad ilmhaaga u hesho aktiifiteet wakhtiga uu firaaqada yahay.

Shaqaalahaa maktabadda ayaa sidoo kale inta badan iyaguna awood u leh inay ku caawiyaan.



Ma doonaysaa in aad bilowdu urur adigu?

Haddii aad rabto adiga ayaa bilaabaya urur aad leedahay.

Si aad ururka u diiwaangeliso oo aad tusaale ahaan caawimo ugu hesho degmada shuruudo ayey degmadu kugu xirysaa. Ka akhri warbixin dheeraad ah sida aad u bilaabayso urur bogga internetka ee www.forening.se



Haddii aanad awoodin

Haddii aad rabto inuu ilmahaagu ka qaybqaato aktiifiteet laakiin aadan awoodi karin (lacag u haynin), waxaa jira caawimaad la heli karo.

Majblomman

Majblomman waa urur aan faa'iido doon ahayn oo loogu talagalay xuquuqda carruurta.

Halkan waxaad ka dalban kartaa lacag si ilmahaagu uga qaybqaato aktiifiteet. Waxay noqon kartaa kharasha xubinnimada, ama inaad awoodo inaad iibsato dhar ama qalab kale oo loogu baahan yahay aktiifiteetka.



QOFKEE AYAA CODSANKARA?

Waalidiinta oo dhami way u codsan karaan lacag carruurtooda. Qof walba waa lagu soo dhaweynayaa inuu codsado, laakiin ma jiraan wax damaanad ah inaad lacag heli doontid. Kuwa akhriya arjiga waxaa saaran waajibaad sirta.

SIDEE AYAAN ANIGU U CODSADAA?

Waxaad ka codsankartaa ururka (majblomma-förening) ee ku yaala magaalad/tuulada aad deggen tahay.

Bogga internetka ee www.majblomman.se, waxaad ka heley-saa ururka halkaa ku yaala. Waxaad sidoo kale halkaas kala soo bixikartaa foomka aad u dirayso. Qof yaqaana ilmahaaga (tusaale macalin, la taliyaha arrimaha bulshada ama xoghaynta arrimaha bulshada) waa inay dadkaasi keenaan caddayn ah inuu ilmahaagu u baahan yahay caawimo. Haddii aad u baahan tahay inuu qof kaa caawiyo buuxinta foomka waxa kaa caawinaya qof jooga iskuulka.



Bangiga wakhtiga firaaqada

Bangiga wakhtiga firaaqadu waa sida maktabad oo kale, laakiin waxay leedahay waxyaabo isboorti iyo maqaallo halkii bedelkeeda buugaag laga heli lahaa. Halkaas ayaad ka amaahan kartaa tusaale ahaan kabaha kubbada cagta, kubbada, kabaha iwm. Waxaa jira waxyaabo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurtaba. Lacag la'aan ayaad ku amaahankartaa muddo laba toddobaad.

Bogga internetka ee www.fritidsbanken.se waxaad ka fiirinkaraa haddii ay jirto meel kuu dhow oo leh bangiga wakhtiga firaaqada!

**Fritids
banken**



Hadda waxaanu rajeyneynaa inaad wax yar ka ogtahay sida loo helo aktiifiteetka adiga ama ilmahaaga! Nasiib wanaagsan!



Länsstyrelsen
Skåne

Buuggan yar waxa laga soo saaray gudaha waqooyi bari Skåne § 37 masharuuc loogu talaglay kaas oo ka hawlgalay waqooyi bari Skåne intii lagu guajiray 2018-2020. Mashruuca wuxuu ka shaqeeyaa sidaa ay dadka wadanka ku cusubi ugu qayb qaadan lahaayeen ururad dhisan magaalooyinka iyagoo adeegsanaya macluumaadka la faafiyey iyo inay tijaabiyaan ururada.

Mashruucaan waxaa iska kaashaday Studieförbundet Bilda, degmada Östra Göinge, degmada Bromölla, degmada Kristianstad, degmada Osby iyo degmada Hässleholm, iyo sidoo kale xafiiska shaqada iyo maamulka gobolka Skåne.

Originalillustrationer av Rawpixel.com, Freepik, Macrovector, Iconicbestiary, Vectorpocket / Freepik. Modifierade av Kristina Hambitzer och Isak Engström. Miniwide, GoodStudio,

Viktoria Kurpas, liravega / Shutterstock.com

Buugan yar waa la isticmaalikaraa waana la faafinkaraa laakiin lama beddelikaro. Wixii su'aalo ah waxaad kala xiriiri kartaa Studieförbundet Bilda Sydväst.

